# Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska

**Waa maxay Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska?**

Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska waa dugsi lagu barto barnaamijka balaaran oo Luuqad labaad ahaan loogu barto Faransiiska. Barnaamijkaan waxa uu ka billoowdaa Fasalka 4 aad. Qaabka waxbarashada lagu bixiyo Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska waa qaab waxbarasho 100% ah gaar ahaan Fasalada 4 aad iyo 5 aad. Dhammaan hawlaha Fasalada 4 aad iyo 5 aad waxay ku baxaan luuqada Faransiiska. Fasalada 6 aad illaa 8 aad, heerka waxbarashada luuqada Faransiiska waa 75%. Dhammaan maadooyinku waxaa lagu dhigi doonaa luuqada Faransiiska marka laga reebo Luuqadaha Ingiriiska iyo Sayriska. Maadada gaarka ah (sida, maadooyinka Caafimaadka iyo Waxbarashada Jirka) waxaa laga yabaa in lagu dhigto af Ingiriis, haddii loo baahdo gaar ahaan marka la eego jadwalka.

**Yaaa dhigan kara Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska?**

✓Waxaa loogu talagalay qoysaska luuqadooda hooyo aysan ahayn Faransiiska.
✓Dhammaan ardayda kujira barnaamijka Ingiriiska ee Fasalka 3 aad waxay codsan karaan inay bilaabaan Fasalka 4 aad.
✓ Waxaan si dhab ah u aaminsanahay in dhammaan ardaydu awoodaan inay bartaan luuqad kale sidaas daraadeed waxaan barnaamijka kusoo dhaweynaynaa kuna taageeraysaa ardayda kujira barnaamijka kale ama kuwa ku hadla luuqadaha kale.
✓ Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska waxa uu ku habboon yahay qoysaska doonaaya inay si fiican ugu hadlaan luuqada Faransiiska, laakiin.
✓ Waxa uu ku habboon yahay qoysaska, sabab kasta ha jirtee, jeclaan lahaa inay helaan fursada ay ku bartaan Luuqada Faransiiska marka ilmahooda xoogaa soo waynaado.

**Faa'idooyinka Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska**

Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska waxa uu ardayda ku hadla luuqad kasta u oggolaanayaa inay kobciyaan heerkooda ku hadalka Luuqada Faransiiska. Inay qaabkaan ku bartaan luuqaad kale waxay sidoo kale ardayda u horseedaa inay helaan faa'idooyin badan oo ay kujiraan:
✓ Waxaa la caddeeyay barashada luuqad kale inay kor u qaado xirfadaha luuqada koowaad ee ardayda.
✓ Barashada luuqad waxay keentaa faa'idooyin kale oo la xariira fahanka sida hormarinta fekarka iyo barashada xirfadaha ardaydu u adeegsan karaan dhammaan qaybaha waxbarashadooda.
✓ Ku hadalka wax ka badan hal luuuqad waxay gacan ka geesataa in ardayda helaan fursado badan mustaqbalka.
✓ Guud ahaan ardayda labada luuqadood ku hadla waxay helaan xirfado xariir oo aad u sareeya sidoo kalena waxay si fudud ku baran karaan luuqado kale oo badan.

**Macluumaadka Codsiga**

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan Barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska iyo qaaba loo codsado, fadlan booqo www.tdsb.on.ca/French.

Hadda, xiliga codsiga barnaamijka Dugsiga Dhexe ee Ku baxa Luuqada Faransiiska uu furmo waa **Janaayo** sanad kasta. Fadlan gal webseetka maalmaha koowaad ee bisha Sebteembar si aad u hesho macluumaad la xariira waqtiga kugu danbeeya ee aad soo gudbin karto codsiga sanadkaas.

Waxaa muhiim ah in la oggaado in meeleynta barnaamijkaan loo damaanad qaadaayo inay heli doonaan dhammaan codsadayaasha soo gudbiya codsiga waqtiga loogu talagalay, laakiin looma damaanad **QAADAAYO** inay heli doonaan dugsi gaar ah.

# Cilmi baaristu waxay sheegtay?

"Habka awood saarida barashada luuqada waxayb guud ahaan ka wanaagsan tahay habka aan luuqada awooda la saarin ee socda waqtiga dheer."
(Weshce, 2002)

Xogtu waxa ay sheegtay ardayda dhigta Barnaamijka Barashada Luuqada Faransiiska inay ka hormareen dhigooda kale ee aan dhigan barnaamijyada barashada luuqada marka loo eego xirfadaha akhriska.
https://www150.statcan.gc.ca/n1/daily-quotidien/040322/dq040322a-eng.htm

"Ardayda dhigta FI waxay hormar ka gaaraan luuqada Faransiiska sidoo kale waxay hormar ka gaaraan maadooyinka dugsiga sida (Sayniska, Cilmiga Bulshada, Xisaabta, iwm) si lamid ah sida ardayda kale ee wax ku barta luuqada Ingiriisiga."
(Wesche, 2002)

Daraasad laga soo aruuriyay meelo kala duduwan oo Kanada ah waxaa lagu oggaaday in ardayda dhigata dugsiga dhexe Faransiiska ee EFI ama MFI aysan wax saameyn xun ah kala kulmin xisaabta, sayniska iyo cilmiga bulshada marka imtixaanka looga qaado Ingiriis.
(Wesche, 2002)

In kastoo luuqada koowaad ee ilmaha laga yaabo inaysan ahayn luuqad bulsho, hadana caruurtu waxay ku guuleysan karaan inay bartaan luuqad dheeraad, sida Faransiiska, ayagoo ku barbar wada barashada luuqada Ingiriiska oo luuqadooda labaad. (O'Brien, 2017)

Xirfadaha luuqada labaad badanaa aad ayaa loo qiimeeyaa waxaana la fishaa inay noqoto luuqada qofku ku shaqeysto.
(O'Brien, 2017)

Daraasad isbarbar dhig ku sameynaysa barnaamijka 50% iyo kan 80% ee barashada Faransiiska ayaa lagu oggaaday in kordhinta barnaamijka Barashada Faransiiska gaar marka lagu barto xisaabta af Faransiiska in si xoogan loola xariirinaayo in saameyn wanaagsan oo dhanka xisaabta ah ka dhalanayso. (Bournot-Trites iyo Akhriska, 2001)

**Buuga Xogta**


Bournot-Trites & Reader (2001) Interdependence Revisited: Mathematics Achievement in an Intensified French Immersion program, Canadian Modern Languages Review (58/1) September.

Wesche, M.B. (2002) Early French Immersion: How has the original Canadian model stood the test of time? An Integrated View of Language Development, Petra Burmeister, Thorsten Piske, and Andreas Rohde (Eds), WVT Wissenschaftlicher Verlag Trier www.fmks-online.de/_wd_showdoc.php?pic=865.

Statistics Canada, (2004) Student Reading Performance in Minority Language Schools. https://www150.statcan.gc.ca/n1/daily-quotidien/040322/dq040322a-eng.htm

O'Brien (2017) Literature Review on the Impact of Second Language Learning, Canadian Association of Second Language Teachers https://www.caslt.org/files/pd/resources/research/Lit-review-Impact-L2-Learning-Exec-Summary.pdf